## CINWAANO WAXTAR LEH

**Association Solidarité Femmes – Centre LAVI**
Verein Frauenhaus / Dumarka u dhiban argagaxa

Case postale 1400
1701 Fribourg
T. 026 322 22 02 (24/24)
info@sf-lavi.ch
www.sf-lavi.ch

**Centre LAVI**
(Pour enfants et hommes)
Opferberatungsstelle für Kinder und Männer / Ciyaalka iyo ragga u gargaarka dhibanayaasha xadgudubka

Rue Hans-Fries 1, CP 29
1705 Fribourg
T. 026 305 15 80
lavi-ohg@fr.ch
www.fr.ch/sej > Aide aux victimes d'infractions

**Police / Polizei / Boolis ka**

T. 026 305 17 17
Nambarka deg – deg ah: 117

**Service de l'enfance et de la jeunesse**
Jugendamt / Haya'da caruurta iyo dhalinyarada

Boulevard de Pérolles 30, CP 29
1705 Fribourg
T. 026 305 15 30
sej-ja@fr.ch
www.fr.ch/sej

**Service de l'état civil et des naturalisations**
Amt für Zivilstandswesen und Einbürgerungen / Dawlada hoose ee xog ogaalka bulshada iyo heli-taanka ama hirgalinta dhalashada

Boulevard de Pérolles 2, CP 471
1701 Fribourg
T. 026 305 14 17
etatcivil@fr.ch
www.fr.ch/secin

**Bureau de l'intégration des migrant-e-s et de la prévention du racisme**
Fachstelle für die Integration der MigrantInnen und für Rassismusprävention / Hafiska is dhex galka muhaajirinta iyo ka hortagga midab kala sooca

Grand-Rue 26
1700 Fribourg
T. 026 305 14 85
integration@fr.ch
www.fr.ch/integration

ETAT DE FRIBOURG
STAAT FREIBURG

**Direction de la sécurité et de la justice** DSJ
**Sicherheits- und Justizdirektion** SJD

SOMALI/SOMALISCH/SOOMAALI - MAI 2011

POMZED.CH




**«nikaax lama samayn karo haddii labada qof oo is guursan doonta aysan raalli ka ahayn»**
Baaqa caalamiga ah ee xuquuqal insaanka.qod.16 (1948)

## GUURKA IYO DALKA SUISSE-KA

Waddanka Suisse-ka gudahiisa, Sharciga nidaaminaya guurka wuxuu u damaanad qaadayaa qof kasta oo qaangaar ah inuu isagu leeyahay xulashada qofka uu guursanayo. Waxaa reeban guurka khasabka ah.

## MUXUU QAANUUNKU KA ORANAYAA ARRINTAAS?

**Qodobka 107 sharciga Madaniga Suisse-ka**
Guurka qofka lagu khasbay, iyadoo la adeegsaday cabsi gelin oo la tusay khatar ku soo fool ah oo ku saabsan naftiisa, caafimaadkiisa ama ama intaas oo lid ku ah qof qaraabadiisa ah, waa sababo keenin kara guurkaas oo baadil laga dhigo.

**Qodobka 181 Sharciga Ciqaabta Suisse-ka**
Qofkii ku khasba qof kaleeto ficil uusan samayn lahayn, ama ka hor istaaga mid uu samayn lahaa,isagoo ku cabsi gelinaya dhibaato culus,ama si kalaba uga hor istaaga xaqii ficilka, wuxuu mutaysanayaa ciqaab xarig ah oo gaari karta ilaa saddex sano ama ciqaab maaliyadeed.

## WAA MAXAY GUURKA KHASABKA AH?

Waxaan ku qiyaasaya inuu yahay guurka khasabka ah marka mid ka mid ah labada is guursanayo uusan diidi karin. Dadka uu saameeyo guurka khasabka ah isma daafici karaan, sababtoo ah cidda khasbaysa waa waa-lidiinta, sodohyada ,qaraabada iyo bulshada. Sidaas darteed caadooyinka bulshada ku dhaqanto waxay noqon karaan kuwo cabsi ku abuura cabsi geliya qofka ama dareensiiya caadhifadda waalidiinta ama shucuur kale oo dhibbanaha qab jebin iyo hoggaansanaan ku noqda.

Guurka qasabka ah wuu ka duwan yahay guurka la qaban qaabiyey oo labada dhinac raalli ka yihiin sababtoo ah kan dambe kuma xad gudbayo xuquuqal insaanka.

## XAALADAHA KALA DUWAN EE GUURKA KHASABKA AH?

- Qof Suisse-ka ku barbaaray oo lagu cadaadinayo guur ama khasab loogu guuriyey qof kale oo jinsigiisa ah,ha degganaado ama yuusan degganaanin Suisse-ka.
- Qof waddankiisa si khasab ah loogu guuriyey qof Suisse-ka ku nool.
- Qof si khasab ah loogu guuriyey ka hor intuusan Suisse-ka u soo haajirin.
- Qof ka soo baxsaday guur khasab ah oo Suisse-ka magangelyo weydiistay.

## XAALADAHAAS MIDKOOD HADDI LA HELO

**Haddii qofku qaangaar ahayn**

- Waa in lala xiriiro Xafiiska Caruurta wargelin, la socosho iyo daryeel.

**Haddii qofku qaangaar yahay**

- Waxaa kaloo qofka loo diri karaa labadda Santrka LAVI mid ka mid ah, wargelin ahaan, la socosho ama looga kaalmeeyo dacwooyinka ama dejin.
- Waxaa lagu hagaajin karaa Police-ka markii uu jiro cadaadis, afduub ama xadgudub u galmasho ah.



## WARGELIN IYO KA HORTAG

Dadka dhibbanayaasha ah, waalidiinta iyo xirfadlayaasha waxay xog iyo talo ka heli karaan hayadaha soo socda.

**Santrka LAVI** Dhegeysi, xogsiin, kaalmo, la socod, meel dejin markay jiraan waxyeello jirka ama nafsi ah.

**www.mariages-forces.ch / www.gegen-zwangsheirat.ch**
Akhbaar guud ee Suisse-ka.

**Hafiska is dhex galka muhaajirinta iyo ka hortagga midab kala sooca**
Wacyi gelin, hanuunin, ururin.